

NIDAAMKA XANIBAADDA

Arimaha soo socdaa waxa ay qaadaa dhigayaan dariiqadda xanibaadda iyo eryidda ee Dugsiyadda Guud ee Portland, waxaa laga soo xigtay Fulinta Hab-maamulka Dugsiyadda Degmadda ee Dariiqadda Xayiraadda iyo Eryidda. Si aad u aragto Fulinta Hab-maamulka booqo shabakadda caalamiga ah iyo xidhiidhka xagga hoose ku lingaxan. http://www.pps.k12.or.us/files/board/4.30.021_ADSuspensionExpulsionFinal_4.9.10.pdf

Xanibaadu waxa ay sii ku meel gaadh ah ugu diidaysaa ardayga xuqa uu uleeyahay in uu xaadiro dugsiga, ama fasalka iyo howlaha dugsiga, mudo (10)cisho oo xidhiidh ah marka laga reebo sida xagga hoose lagu qoray.

Nidaamka Guud: Goorta ardaygu la yimaado waxaa dhici karta in la xanibo, maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray waxay:

- Waxay raaci doonaan nidaamka asaasiga ah ee duwidda anshaxa.
 - Hubinayaan iyagga oo adeegsanaya baadhitaan
 - Cadaynayaan hadii ardaygu lahaa dabci la saanqaadaya qorsha 504, ama waxbarashadda gaadhka ah, iyadii oo hadii ay sidaa tahay la raacay.
 - Tixgelinayaan hadii marar hore lagu talaabsaday falal lagu eedeeyey.
- Reference [4.30.020-AD](#).
- Hubinayaan in xanibaadu ay ku haboontahay iyadii oo ka dhigan edbin dembiilaha ta tuhmay.
 - Qabanayaan fadhi xanibaad oo aan caadi ahayn oo ay la yeeshaan ardayga si loogu wargeliyaan tuhunka lagu eedeeyey luqad uu fahmi karo islamarkaana siinayaan ardayga fursad uu isku daafici karo/karto kuna sheegi karto sida ay arintu tahay dhinaceeda. Maamulaha ama howlwadeenka loo idmaday ayaa go'aan ka gaadhi doona talaabadda anshax ee ku haboon, waxaa kale oo uu tixgelin siin karaa xanibaad dugsiga dhexdiisa ah hadii qalabka iyo holwadeenno qabatimi kara la helayo
 - Iyagii oo ruuxsan ay ku dadaalayaan wargelinta waalidka/hagaha iyadii oo qoraal ah luqad ay waalidka iyo ardayguba fahmayaan, marka lagu daro xaaladaha dib-dhigidda iyo nidaamka rafcaanka, hadii ardayga lagu xannibo dibada ama gudaha dugsiga. Waa in lala xidhiidha waalidka/hagaha ka hor inta aan arday dugsiga dhexe, hoose ama itaaldaran loo dirin aqalka.
 - Siinayaan shaqo guri marka laga codsado ardayda lagu xanibay dibadda dugsiga, sii loo hubiyo in ay waxbarashadooda sii joogteeyaan. Ardayga la xanibay waxaa laga filayaa in uu kasoo shaqeeyo shaqadda guri ee la siiyey inta uu ku jiro xanibaadda. Markii ay codsadaan Ardayda waa in loo sheegaa waajibaadka inta ay ku jiraan xiliga xanibaadda. Ardayda waa in la siiyaa waajibaad, mashaariic, ama imtixaanaad ay ku kabaan intii ay ka maqnaayeen dugsiga oo keliya markii ay tahay howlahaasi kuwa ay ku helayaan dhibco. Macalimiintu kuma qasbana in ay ku bixiyaan waqti si ay ola shaqeeyaan oo ugu diyaariyaan waajibaad arday aan habdhaqan wanaagsanayn.

Goorta Xanibaadi Hirgasho: Ardayga lagu xannibo dugsiga ama dibadda dugsiga waxa ay xanibaadaasi hirgalaysaa kadib marka fadhi aan rasmi ahayn la qabto islamarkaana waalidka/hagaha lagu wargeliyey ama gabagabadda dugsiga.

Dib-ugu-noqoshadda dugsiga: La kulanka waalidka/hagaha waa in la qabtaa ka hor inta uusan ardaygu kusoo laaban dugsiga kadib xiligii xanibaada si loogu hel xal eedayntii islamarkaana loo ogaado dariiqad lagu saxartiri karo dabciga ardayga. Waalidka/hagahu waxay codsan karaan la kulanka maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray si loo hal-abuuro qorshe lagu talaabsado si looga badbaadiyo ardayga dhacdo kale oo uu ku talaabsado

Xanibaadda Degdega ah

Marka ay jirto xaalad caafimaad ama badbaadin degdeg ah islamarkaana ay qasab noqoto in ardayga laga saaro bii'adda waxbarasho, maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray waa in ay wargeliyaan waalidka/hagaha. Kulan aan rasmi ahayn oo la qabto ayaa loo dib dhigi kara illaa (3)cisho oo maalmaha shaqadda ah.

Ka dagaalanka Xanibaadda: Aradyga ama waalidka/hagaha way ka doodi karaan xanibaadda, ugu horaynba waxay codsanayaan kulan ay la qaataan maamulaha, hadii uusan maamuluhu horay ubixin go'aanka xanibaadda, kadibna waxay codsanayaan in mas'uulka degmadda u qaabilsan kormeerka dugsiga ardaygu dhigto uu dib-u-eegid ku sameeyo, kani waa heerka ugu dambeeyo ee dib-u-eegidda xanibaadda.